

Xeer Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Lamb. 4 ee 8 Janaayo 1969

Amaradda habeynaayo fulinta qodobada 12 iyo 14 ee Sharciga lamb 1 ee 6 Juun 1968 “Doorashooyinka siyaasadeed iyo kuwa maamulka”

WASIIRKA

Kadib markii sharciga lamb. 13 ee 6 Juun 1968 oo khuseeya “doorashooyinka siyaasadda iyo kuwa maamulka iyo is bedellada lagu sameeyey arkay.

Kadib markii la garoowsaday in haddii Dowladda Hoose ay ku taalo goob ka duwan magaala madaxa, liisaska doorashooyinka ee Golaha Dowladda Hoose waxaa la geyn karaa isla goobto oo ay ku taalo saldhigga dowladda Hoose.

Kadib markii la raaco tilmaamaha qod. 75 ee sharci la xusay.

WUXUU XEEREYAY

Qod. 1

Waxaa la soo saaray amarkan oo nidaamiye ah.

Haddii Dowladda Hoose ay ku taalo goob ka duwan magaala madaxa, kadib markii uu Xisbiga Siyaasaddu ay codsato, liisaska musharaxiinta ee doorashada xubnaha Golaha Dowladda Hoose waxaa la geyn karaa isla goobto Dowladda Hoose ay ku taalo, Guddomiyaha Degmada ama cid di wakiil ka.

Qod. 2

Marba haddii uu Xisbigu ka faa’ideysanayo fursada la siiyey, wuxuu u dhiibi kara wakiilada liiska, qoraalka ay ku horgeynaya liiska oo la saxiixay, Xafiiska Guddomiyaha Degmada qaabilsan saacaddu intii aysan dhaafin 18:00 saac ee 45 beri ka hor inta aanan la qabanin cod bixinta.

Qod. 3

Amar-nidaamiyahaani wuxuu hirgeli doona isla maalinta lagu daabacu Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 8 Jannayo 1969.

Wasiirka

Yasin Nur Hassan
